



URURKA LAASDHUURE Horumarinta Waxbarashada

WAAXDA DHAQAALAHA


1. Khasnajiga guud iyo Xisaabiyaha (ahna Xoghayaha guud) waxay u xilsaaran yihiin Waaxda Dhaqaalaha Ururka Laasdhuure, waxaanay ku shaqeynayaan Xeer-Hoosaadka Dhaqaalaha, kaasi oo soo baxay July/2024.

HAB-U-SOCODKA SHAQADA KHASNAJIGA

2. Bil kasta maalinka 1aad:
 - a. Waa inuu gole-weynaha u gudbiyo fariintii qabashada qaadhanka bisha, kuna baahiyo whatsapp-group-ka ururka, fariintaasi oo ka kooban:
 - i. **Hordhac:**
 - Magaca ururka,
 - Bisha lagu jiro,
 - Mahadnaqa xubnaha ururka,
 - ii. **Nuxur:**
 - Zaad Number + Dahabshiil Account,
 - Qaadhaanka laga rabo (Billeyaasha / 6-Biloodleyaasha / Sanadleyaasha)
 - iii. **Tilmaamo:**
 - Sarifka shilinka inta uu noqonayo \$5 / \$30 / \$60
 - In xubin kasta numberkiisa ka soo diro qaadhaanka,
 - In xubin kasta soo diro qaadhaankii uu ogolaaday oo dhameystiran,
 - In xubin kasta qaadhaanka ku soo diro wakhtiga loogu talagalay,
 - In qaadhaanka lagu soo diro labada account ee ururka oo keliya,
 - Iyo wixii Khasnajigu u arko inay muhiim tahay in xubnaha loo sheego,
 - iv. **Gunaanad:**
 - Magaca khasnajiga oo sadexan,
 - + Khasnajiga Guud,

- 3. Jimce kasta:**
 - a.** Waa inuu mar kale fariintii qabashada qaadhaanka ku baahiyo group-ka whatsapp ka
 - b.** Waa inuu u diro Xidhiidhiyaha warbixinta billeyaasha ilaa Jimcahaasi soo bixiyay.
- 4. Mar kasta oo qaadhaan ku soo dhaco Zaadka:**
 - a.** Waa inuu whatsapp-groupka ku soo qoro fariin mahadnaq ah, oo qofkii soo bixiyay uu ugu sheegayo, inuu ka hayo qaadhaanka uu soo diray.
 - b.** Waa inuu isla maalinkaasi transaction-kaasi ku daro foomka qaadhaan-qabashada ee website-ka, si taariikhdii qaadhaan-bixintu aanay u lumin.
- 5. Kharash kasta oo ka baxa khasnadda:**
 - a.** Waa inuu cheque ku saaro,
 - b.** Waa inuu saxeexo voucher-ka kharash saaridda,
 - c.** Waa inuu transaction-kaasi ku daro foomka kharashka ee website-ka,
- 6. Mar kasta oo sarifku is-badalo:**
 - a.** Waa inuu whatsapp-groupka ku soo qoro fariin uu ugu sheegayo xubnaha, xadiga shilinka ay bixinayaan Bileyaasha, 6-Biloodleyaasha iyo Sanadleyaashuba.
- 7. 25 ilaa 26-ka bisha:**
 - a.** Waa inuu diyaariyo cheque-gii fee-ga ardeyda, oo uu kala soo baxo account-ka,
 - b.** Waa inuu saxeexo voucher-ka lacag saaridda,
 - c.** Waa inuu transaction-daasi ku daro foomka kharashaadka baxay ee website-ka.
- 8. 27 ilaa 29-ka bisha:**
 - a.** Waa inuu sarifo shilinka ku jira Zaadka,
 - b.** Waa inuu dhamaan lacagta Zaadka ku jirta oo Dollar ah u wareejiyo Account-ka,
 - c.** Waa inuu transaction-nadaasi ku daro foomamka website-ka qaybaha diiwaangelinta lacagta la sarifay iyo lacagta dollarka ah ee account-ka loo wareejiyay,
- 9. 30-ka bisha:**
 - a.** Waa in Account-ka dahabshiil iyo wixii qaadhaan ku soo dhacay bishaa soo daabaco, kadibna waa inuu transaction-daasi ku daro foomka qaadhaan-qabashada website ka
 - b.** Waa inuu website-ka kala soo dego warbixinta (Reports)
 - i.** Warbixinta dhamaan qaadhaanadii la soo diray bishaasi,
 - ii.** Warbixinta dhamaan billeyaashii soo bixiyay bishaasi,
 - iii.** Warbixinta dhamaan billeyaashii aan soo bixinin bishaasi

- iv.** Warbixinta dhamaan kharashaadkii baxay bishaasi,
- c.** Waa inuu soo daabaco dhamaan wixii Zaadka dollar/shilin ba ku soo dhacay bishaasi
- d.** Waa inuu warbixinahaasi u diro Gudoomiyaha, Gud-Xigeenka iyo Xoghayaha,
- e.** Waa inuu whatsapp-groupka ururka ku baahiyo afarta warbixinood ee kala ah:
 - i.** Warbixinta dhamaan qaadhaanadii la soo diray bishaasi,
 - ii.** Warbixinta dhamaan bileyaashii soo bixiyay bishaasi,
 - iii.** Warbixinta dhamaan bileyaashii aan soo bixinin bishaasi
 - iv.** Warbixinta dhamaan kharashaadkii baxay bishaasi,
- f.** Waa inuu barnaamijka Wacyi-Gelinta Ururka ka jeediyo kalmad ku saabsan:
 - i.** Bishaasi xubnihii qaadhaanka soo bixiyay,
 - ii.** Kharashaadkii baxay,
 - iii.** Iyo halka khasnadda xisaabteedu marayso,
- 10.** 1-da bisha kale:
 - a.** Waa inuu Account-ka ka soo saaro fee-gii ardeyda,
 - b.** Kadibna waa inuu soo bixiyo fee-gii ardeyda,
- 11.** Hadii uu Khasnajigu hayo cabasho ama tabasho, wuxuu ku soo qorayaa foomka cabashada guddida, sida:
 - a.** Hadii xubin guddida ah uu gef ama gaabis shaqo ka tirsanayo,
 - b.** Hadii shaqadu ku badan tahay,
 - c.** Hadii shaqada ama xilka uu rabo inuu joojiyo,
 - d.** Iyo nooc kasta oo cabasho ama tabasho ah,



Cumer Muuse Caalin
Gudoomiyaha Ururka Laasdhure